Korrsada3aad. Kulanka Casharka 1aad

Hawsha 1aad. Kiisaska daraasadaha

1. **Dahabo** waxay ku khasbanaatay inay ka qaxdo tuuladeeda iyada iyo qoyskeedaba sababo la xiriira amni-darro iyo weerarro isdaba joog ah oo kaga yimaada kooxaha hubeysan. Waxay ka tagtay gurigii reerku ka dhiseen dhul reerku ka dhaxlay sodoggeed. Waxay ka maqashay saaxibbo kuwaasoo wali degan agagaarka gurigeeda in la bililiqaystay, la burburiyay iyo in dhulkeedii ay dagan yihiin dad kale. Ninkeeda ayaa dhintay 6 bilood ka hor, mana lahan warqad lahaansho oo cadeyneysa in dhulkan ay leeyihiin qoyska reer xididkeeda.

   Qoyska marka hore wuxuu degay degsiimo loo barakacay oo ku dhow bartamaha magaalada halkaasoo Dahabo ay shaqo nadiifin ah uga heshay dukaanle. Laakiin waxaa si xoog ah uga saaray albaabka ilaaliyaha oo raba inuu dhulkiisa soo celiyo. Waxaa loo raray bannaanka magaalada, oo ka fog fursadaha habnololeed. Dahabo ma gaari karto bartamaha magaalada inta lagu jiro xilli roobaadka maadaama aysan ka gudbi karin wabiga kala qeybiya degitaankeeda iyo wadada weyn. Intaas waxaa sii dheer, ma aysan awoodin qarashka gaadiidka ee ay maalin walba ugu safarto magaalada waxayna ka walwalaysaa shaqadeeda. Waxay dhawaan maqashay in laga yaabo in markale laga saaro goobta ay degan tahay iyada oo dhulka ay degantahay la iibiyay si looga dhiso garoon diyaaradeed oo cusub.

   Waxay jeceshahay inay ku laabato halkii ay ka timid markii xaaladdu hagaagto laakiin ma haysato meel ay dib ugu laabato. Waxay ogtahay in haddii reer xididkeeda ay dib u gacantooda u soo galo dhulkeeda iyada iyo carruurteeda wax xuquuq ah ku yeelan doonin.

2. **Aaden Axmed** iyo qoyskiisa waa xoolo dhaqato. Waxay uga dhamaaday dhamaan xoolahoodii oo dhan abaarihii waxayna gabaad ka heleen xereyaha Dadka Gudaha Ku Barokacay ee magaalada ah isaga iyo xaaskiisa iyo afar carruur ah. Waxay ka heleen guri ayagoo u maray wakiil matala milkiileyaasha dhulka iyo hantida ee ka shaqeeya halkaas waxayna siiyaan mulkiilaha Jiingada saran hoyga $ 10 bishii, iyo $ 5 bishii oo ay ssiyaan mulkiilayaasha dhulka. Aaden Axmed wuu xanuunsaday mana awoodo inuu ka shaqeeyo goobaha dhismaha uu ka heli jiray shaqo maalinle ah hada ka hor. Xaaskiisa ma aysan awoodin inay shaqo hesho muddo ka badan seddex bilood. Dhulka ay kireystaan kuma filna in wax lagu beero waxayna ku tiirsan yihiin gargaar bina'aadanimo oo ay ka helaan cunnadooda. Waxa lagu leeyahay $ 80 oo ah haraaga ka hara kirada oo uruurtay waxayna ka baqayaan in laga saaro guriga. Bulshada martida loo yahay ayaa ka cabanaya cuduro, oo ay ku jiraan caabuqa COVID 19 oo ay faafinayaan barakacayaasha ku nool xerada sababo la xiriira helitaanka biyaha oo xun, nadaafada, iyo fayadhowrka oo liita.

3. **Caa'isha** waalidkeed iyo walaalaheed waxay iibiyeen xoolahooda ka hor inta aysan ka qaxin colaadaha. Waalidiinteed iyo walaalkeed ka weyn ayaa ku dhintay weerar wax yar kadib markii ay barakaceen. Caa'isha waxay isticmaashay qeyb ka mid ah lacagta ay heshay iibka lo'da si ay ugu furato dukaan khudradda lagu iibiyo. Markii ay guursatay waxay iibin jirtay

qudaarta ninkeeduna shaqo ma haysan. Waxay wada kobciyeen meheraddeeda oo hadda waxay leeyihiin 3 carruur ah. Waxay ku wada iibsadeen dhul lacagteeda, waxayna rumaysatay inay dhulka magaceeda ku diiwaangeliyeen. Markii dambe, waxay maqashay xan ah inuu naag kale guursaday. Waxay u sheegtay ninkeeda inay caadi tahay, laakiin ayana dooneynin inay lacagteeda ama hantideeda la wadaagto naagta kale. Odaygeeda ayaa u sheegay inaysan lahayn wax ikhtiyaari ah, oo ay tahay inay la wadaagto lacagteeda naagta kale. Markii ay bilaabeen inay ku dagaallamaan dhulki, Caa'isha waxay ogaatay in ninkeedu dhab ahaantii dhulka magiciisa ku diiwaangeliyey; ma ayana ogeyn maxaa yeelay wax ma aqrin karto. Markii ay dacwadeedii u keentay odayaasha, waxay ku yidhaahdeen "gurigaaga tag oo ninkaaga iska afgarta". Caa'isha ma lahan qoys ama reer ay taageero ugu laabato.

4. **Cali, xaaskiisa iyo 5 caruur ah** oo uu dhalay waxay ka soo qaxeen amni xumo waxayna degeen xero laga soo saaray waxay degaan guri yar oo ka fog habnololeedka iyo shaqo. Cali lacag aad u fara badan ayuu ku bixiyaa subax walba gaaritaanka magaalada isagoo aan ogeyn inuu shaqo maalmeed heli doono iyo in kale. Wuxuu maqlay inuu aabihiis dhintay wuuna ogyahay inuu kulahaa dhul yar meeshii ay ka yimaadeen. Markii uu weyddiiyay walaashiis inay war ka siiso waxay usheegtay inaysan jirin diiwaan hanti iyo xadeyn oo ku saabsan dhulkaas. Waxay intaa ku dartay in dadka cusub ee ka soo jeeda qabiilka ugu badan ay xoolahooda daaqsadaan qayb ka mid ah dhulka. Cali ma garanayo wuxuu sameeyo si uu isugu dayo inuu helo xuquudiisa dhaxalkiisa